

# **Hage loogu tala-galay Isticmaalaha** **Qorshaha**

SOO BAN DHIGIDDA LOCATA – caawimada lugu siinayo si aad guri cusub uga hesho Galbeedka London

QORSHAHAN HAWSHIISA HABKA LOO WADO

SIDEEN LOCATA XUBIN UGA NOQON KARAA?

SINNAANTA HELITAANKA - WAA MAXAY CAAWIMADA ISOO GAARI DOONTAA?

MAXAA DHICI DOONA HADDII AAN RABO INAAN U GUURO DEGAAN HOY AH?

MAXAA DHICI DOONA HADDII AY I HAYSATO DHIBAATO CAAFIMAAD AMA MID MASKAXDA LA XIRIIRTA?

MAXAA DHICI DOONA HADDII QOF GURIGAYGA IGULA NOOL UU KU ADAG YAHAY DHAQ-DHAQAAQU?

MAXAA DHICI DOONA HADDII AY XAALADAYDU IS-BEDESHO?

SIDEEN U HELI KARAA JAWAAB-CELIS KU SAABSAN CODSIYADAYDA?

SIDEEN U CODSAN KARAA GURI?

MAXAY YIHIIN FURSADAH KALE EE AAN GURI KU HELI KARO?

SHANTA TALLAABOOD EE LUGU DOORTO GURI CUSUB

## **SOO BAN DHIGIDDA LOCATA – caawimada lugu siinayo si aad guri cusub uga hesho Galbeedka London**

Kawnsalada Brent, Ealing, Hammersmith iyo Fulham, Harrow, Hillingdon iyo Hounslow waxay iminka isticmaalaan Locata, sidaas oo kalena waxaa u isticmaala Qoysaska Ealing (Ealing Family), Guryeynta Paradigm (Paradigm Housing) ururka guryeynta ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan PCHA, Thames Valley, Guryeynta Acton (Acton Housing), Ururka Guryeynta Shepherds Bush iyo Stadium (Shepherds Bush and Stadium Housing Association) si ay u keenaan fursado guri lugu heli karo.

Locata waxay kuu soo bandhigaysaa fursado dheeraad ah oo khuseeya meeshaad rabtid inaad ku noolaato. Waqtigii tagay, Kawnsalkaaga ayaa go'aan ka gaari jirey meeshii guri lagaa siin lahaa ama goortii lugu siin lahaa. Iminka waxaad fursad u yeelan doontaa inaad adigu dooraato.

Kiraystayaasha hadda ee Kawnsalka ama Ururada Guryeynta ee jecelaan lahaa inay u wareegaan guri cusub waxay isticmaali karaan Locata si ay guri cusub u helaan. Tani waxaa weliba raacsan dadka guri-doonka ah - dadka ku jira diiwaanka guryeynta ama guri la'.

Labadii todobaadba mar ayay Locata soo saartaa wargeys bilaash oo lugu magacaabo, 'Locata HOME', kaasoo ay ku jiraan dhammaan guryaha Kawnsalka iyo Ururka Guryeynta ee diyaar ah. Waxaad fiirin kartaa xayaysiisyada waxaanad go'aansan kartaa inaad rabtid in xisaabta lugugu daro wixii ku saabsan guri kasta oo ka mid ah guryaha. Danta aad ka qabtid guryaha waa inaad ku muujisaa adigoo iyaga codsanaya. Kooban ku saabsan dadka guryaha codsan kara iyo habka loo codsado waxaa laga dhex heli karaa Hagahan loogu tala-galay Istimaalaha Qorshaha.

Si aad guri cusub u heshid, waa inaad codsataa guri ku jira 'Locata HOME'. Kawnsalada iyo Ururada Guryeynta ee ka mid ah qorshaha Locata haddeeto dadkaan qorshaha Locata ka codsanin uguma deeqaan guryaha diyaarka ah.

Locata waxay ku siinaysaa fursado dheeraad ah oo ku saabsan meeshaad rabtid inaad ku noolaato. Waxay weliba fikrad intaas ka fiican kaa siinaysaa guryaha diyaar ka ah xaafaddaada.

## **QORSHAHAN HAWSHIISA HABKA LOO WADO**

Marka la adeegsado Qorshaha Locata, ma ahaan doonto Kawnsalka ama ururka Guryeynta kuwa kuu heli doona kuuguna deeqi doona guri; halkays sidaas ka ahaan lahayd adigaa raadsan kara gurigaaga adigoo isticmaalaya wargeyska 'Locata HOME'.

Guryaha diyaarka ah waxaa lugu soo xayeysiin doonaa:

- Wargeyskeena bilaashka ee lagu magacaabo 'Locata HOME' dhexdiisa, kaasoo caadi ahaan soo baxa labadii todobaadba mar. 'Locata HOME' waxaa laga heli karaa meelo kala-duwan sida waaxyada guryeynta, xafiisyada adeegyada bulsheed, ururada iskaa-wax-uqabso ah iyo maktabadaha cid kasta u furan 6da xaafadood ee is-kaashigan ka mid ah gudahooda. Waannu weliba boosta kuugu soo diri karnaa haddii aad iska bixiso ujro rukun.
- Shabakadeena: [www.locata.org](http://www.locata.org)

Waxaad codsan kartaa ilaa iyo 3 guri daabacaad kastaba adigoo buuxinaya tigid yar (oo lugu siin doono), telefoonkaad ku codsan kartaa, telefoonka qoraalka ayaad ku codsan kartaa waxaanad weliba codsan kartaa adigoo adeegsanaya shabakada Locata.

Xubnaha cusub waxay heli doonaan dhammaan wixii akhbaar ah, taasoo ay ka mid yihiin tigidadu, markay ku soo biiraan qorshaha.

'Locata HOME' waxuu faah-faahin kaa sinayaa:

- Guri kasta oo diyaar ah
- Ijaarka todobaadkii la rabo
- Qofka is-ka leh
- Dadka codsan kara
- Goorta loo guuri karo
- Haddii uu gurigu diyaar u yahay in xaafad kale laga soo codsado
- Meesha laga heli karo akhbaar xaafadda ku saabsan; sida dugsiyada, gaadiidka, dukaanada, iwm

Xubnuhu waxay ahaan doonaan ama Kiraysteyaal (kuwani caadi ahaan waa kiraysteyaal ku kalsoon guryahooda ay ka kiraysteen dawlad hoose oo aan is-kaashanno ama waa kiraysteyaal ku kalsoon ama loogu ballan-qaaday guryaha ay ka kiraysteen urur

guryeyn oo xaafadda ah) AMA waxay noqon doonaan dad Guri-doon ah, oo ay ka mid yihiin dadka guri la' iyo dadka kale ee ku jira diiwaanka guryeynta.

Xubnaha dhammaantood Dabaqad ayaa la geliyaa. Dabaqadda aad ku jirtid waxaa kuu sheegi doona ninka gurigaaga is-ka leh ama dawladda hoose ee aad diiwaanka kaga jirto. Dabaqad walba gudeheeda mudnaantu waxay ku xiran tahay taariikhda.

**Hoos waxaa ku qoran Dabaqadaha oo la soo koobay. Tani ma aha taxane buuxa ee qaybaha waana inaad la xiriirtid waaxdaada guryeynta kuwaas oo aad ka diiwaan-gashay haddii aad u baahato akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan qorshahan sida uu ku khuseeyo.**

**Dabaqadda A (Xaaladda deg-degga ah/Mudnaanta Ugu sareeysa)**

- Waxaad qabtaa dhibaato caafimaad oo naftaada halis gelinaysa, taasoo ay sii xumaynayso meeshaad hadda ku nooshahay amaba waxaad u baahantahay inaad guurto xaalad kale oo deg-deg ah awgeed.
- Qof guri la' ayaad tahay, waxaad ku jirtaa dadka baahidoodu ugu mudnaan badan tahay waxaanad ku nooshahay degaan ku meel-gaar ah ninka guriga lehna wuxuu rabaa in gurigiisa loo soo cesho, ama degaanka ku meel-gaarka ah kuguma habboona suuragalna ma aha in luguu helo degaan kale oo ku meel-gaar ah oo kugu habboon.
- Waaxda guryeyntu waxay ogolaadeen talada Adeegyada Bulsheed oo sheegaysay inaad u baahantahay in lugu siiyo degaan joogto ah si loo hubiyo inaad ilmo aadan dhalin hayn karto ama aad korsan karto.
- Waxaad tahay kirayste naftiisu ay halis geli doonto haddii aad sii joogto gurigaaga rabsho awgeed – fadlan ogsoonow inay tani khusayso uun kiraysteyaasha Kawnsalka/Ururka Guryeynta.
- Waxaad tahay kirayste ciidanka ka mid ahaan jiray kaasoo ay Kawnsalka waajib ku tahay inay guri kale siiyaan.
- Waxaad tahay kirayste u baahan inuu guuro waayo gurigaaga ayaa mar dhow la dumin doonaa ama dib loo dhisi doonaa.
- Waxaad tahay kirayste u baahan inuu u guuro guri dib loo habeeyey oo baahidiisa ku habboon.
- Waxaad tahay kirayste ku nool guri dib loo habeeyey oo aadan haddeeto u baahnayn laakiin kaasi qof kale ayuu wax-tari kara.

- Waxaad tahay qof kiraystay guri laba qol oo hurdo ama in ka badan leh waxaanada ogoshahay inaad u guurto guri hal qol oo hurdo leh ama waxaad iska bixinaysaa laba qol oo hurdo
- Waxaad tahay qof dhaxlay kirada guri Kawnsal waxaanad ogolaatay inaad u guurto studio ama guri hal qol oo hurdo leh ama waxaad iska bixinaysaa laba qol oo hurdo ama in ka badan.
- Waxaad ku jirtaa guri, kaasoo hoos yimaadda amar gadasho khasab ah oo/ama ay Kawnsalka Waajib ku tahay in uu ku geeyo meel kale Sida qaanuunku qabo.

### **DABAQADDA B (Si deg-deg ah ugu Baahan In uu Guuro)**

- Waxaad si deg-deg ah ugu baahantahay inaad guurto sababtoo caafimaadka ama bulshada la xiriirta, taasoo uu ogolaaday qofka gurigaaga leh.
- Waxaad si deg-deg ah ugu baahantahay inaad guurto kadeedis ama halis rabshadayn awgeed (Fadlan ogosoonow inay tani khasayso uun kiraysteyaasha Kawnsalka/Ururka Guryeynta)
- Qof guri la' ayaad tahay, Kawnsalku waxay ogolaadeen inay iyaga waajib ku tahay inay guri kale ku siiyaan waxaanad ku jirtaa hudheel la seexdo lagana qureecdo, hostel ama si ku meel-gaar ah ayaad reerkiina ama asxaabtaada ula joogtaa.
- Heshiis ijaar ma haysatid; waxaad haysataa ilmo aad masuul ka tahay, qol hurdo ma lihid waxaanad dad kale la wadaagtaa musqusha, jikada iyo wixii sidaas oo kale ah.
- Waxaad u baahantahay inaad ka soo baxdo daryeel ama hooy lugugu taageero waana la ogolaaday in meel kale lugu dejiyo barnaamij gaar ah oo leh xad la ogolyahay awgii.
- Waxaad tahay kirayste ku jira degaan weyn laakiin waxaad rabtaa inaad iska dhaafto qol hurdo oo siyaado ah, laakiin waxaad weli u baahantahay laba qol oo hurdo ama in ka badan.
- Waxaad tahay kirayste waxaana la filayaa in gurigaaga la dumiyo, ama sida qaanuunku qabo waad buux-dhaafteen ama waxaa la ogolaaday in aad u baahantahay inaad guurto sababo kale oo maamulka la xiriira awgood.
- Waxaad dhaxashay kirada guri Kawnsal waxaanad ogolaatay inaad u guurto guri kani ka yar oo leh laba qol oo hurdo ama in ka badan.
- Waxaad tahay kirayste hore adigoo, markii aad ka tanaasushay kiradii hore, Kawnsalku uu kuugu ballan-qaaday inuu dib guri kuu siiyo waqti dambe.

### **DABAQADDA C (Baahi Guryeyn la xiriirta oo Cad)**

- Waxaad u baahantahay inaad guurto sababo caafimaadka la xiriira awgood ama sababtoo ah xaalad degaan oo an lugu qancin karin sida buux-dhaaf ama xaalad nadaafad daran.
- Qorshe daryeel oo ay wadeen Adeegyada Bulsheed ayaa muujiyey inaad u baahantahay inaad guurto amaba waxaa Adeegyada Bulsheed lagula heshiyey inay baahidaadu noqon karto hab lagaga raysto dhibaato bulshada la xiriirta.
- Waxaad tahay qof duq ah oo u guuraya degaan hooy ah
- Waxaad tahay qof guri la' laakiin uma qalantid inaad ku jirto Dabaqadda A ama B.

### **DABAQADDA D**

- Dhammaan Kiraystayaasha Wareegeya iyo Dadka guri-doonka ah ee kale ee aan soo hoos galayn dabaqadaha dusha ku qoran ee mudnaan ee A, B ama C.

### **SIDEEN LOCATA XUBIN UGA NOQON KARAA?**

Si toos ah ayaad xubin uga tahay Locata haddii aad guri ka kiraysatay dadka guryaha leh ee aan is-kaashano midkood oonad diiwaanka u gashay in meel kale lugu wareejiyo, ama haddii aad tahay guri-doon, kaasoo ay soo raacaan dadka guri la' iyo dadka kale ee Diiwaanka Guryeynta kaga jira kawnsalada aan is-kaashano midkood.

Dadka kale waxay u baahan doonaan inay is-ka qoran iyagoo adeegsanaya qofka leh gurigooda ama Waaxda Guryeynta ee kawnsalka xaafaddooda.

### **SINNAANTA HELITAANKA - WAA MAXAY CAAWIMADA ISOO GAARI DOONTAA?**

Shaqaale guryeyn oo si buuxda loo tababaray, shaqaale bulsheed iyo hay'ado iskaa-wax-uqabso ah ayaa diyaar u ahaan doona in ay la taliyaan codsadeyaasha baylah ah iyo kuwa ay luqaddu ama akhristu ku adag tahay sidaas-awgeed oo ay kaaga gargaari karaan inaad adeegsato 'Locata HOME' si aad guri u hesho

Qof walba waa inuu isticmaalo 'Locata HOME' si ay guri kale u helaan. Haddii aad codsan weydid guryaha diyaarka ah wax lugu siin maayo.

## **MAXAA DHICI DOONA HADDII AAN RABO INAAN U GUURO DEGAAN HOOY AH?**

Degaanka hooy ah waa degaan si ujeeddo leh loo dhisay, oo si gaar ah loogu tala-galay dadka yara da' weyn ee madaxbannaan ee iyagu keligood is-dabari kara ugu badnaan. Qorsheyaasha hooy ah intooda ugu badan waxay leeyihiin ilaaliye ama maamule qorshe hooy ah oo halkaas diyaar ku ah si u caawimo iyo talo u bixiyo. Si aad u codsato degaan hooy ah waa in hore lugu soo qiimeeyey inaad u qalantid degaan hooy ah. Si aad u fiirisid inaad u qalantid ama si aad u hesho war dheeraad ah oo ku saabsan waxa soo bandhigan fadlan la xiriir qofka leh gurigaaga ama waaxdaada guryeynta.

## **MAXAA DHICI DOONA HADDII AY I HAYSATO DHIBAATO CAAFIMAAD AMA MID MASKAXDA LA XIRIIRTA?**

Haddii adiga ama qof gurigaaga ku nool ay idin haysato dhibaato caafimaad ama mid maskaxda la xiriirta amaba aad qabtaan baahi gaar ah oo kale waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad buuxiso foom aad xaalaadda caafimaadkaaga ku sheegaysid. Kani wuxuu wax kaa weydiin doonaa cudurka aad qabtid iyo sida guriga aad hadda ku nooshahay uu kaas u sii xumeeyey iyo sababta aad ugu baahantahay inaad guurto. Uma baahnid inaad ka soo qaadatid takhtarkaaga warqad caafimaadkaaga ka hadlaysa. La-taliyeheena caafimaadka ayaa markaas eegi doona codsigaaga oona go'aan ka gaari doona inay wax ku tari doonto haddii guri kale lugu siiyo iyo sida deg-degga ah ee aad ugu baahantahay inaad guurto.

## **MAXAA DHICI DOONA HADDII QOF GURIGAYGA IGULA NOOL UU KU ADAG YAHAY DHAQ-DHAQAAQU?**

Markaad buuxinayso foomka aad ku sheegaysid xaaladda caafimaadkaaga waxaa lugu weydiin doonaa in adiga ama qof kale oo ku nool gurigaaga ay idinku adag yihiin socodku ama fuulidda jaranjarada, taasoo ku lug yeelan doonta nooca guriga aan kuugu deeqi karno. Haddii, tusaale ahaan, qof gurigaaga ku nool uu isticmaalo gaariga yar ee curyaanka waxay taasi keeni kartaa in takhtar daaweeya cuduradda jirka la xiriira loo diyaariyo si uu idiin soo booqdo oo u baaro waxyaaba guryeynta la xiriira ee gurigaagu uu u baahanyahay.

Haddii la ogolaado inaad si gaar ah ugu baahantahay dib-u habayn baahidaada ku habboon waxaa lugugu dari doona kuwan soo socda midkood:

- Kooxda Dhaq-dhaqaaqa 1 - qofka gudaha iyo dibadda ku adeegsade gaariga yar ee curyaanka.
- Kooxda Dhaq-dhaqaaqa 2 – dadka aan awoodi karin inay fuulaan sallaan ama jaranjaro oona laga yaabo inay marmarka qaarkood adeegsadaan gaariga yar ee curyaanka.
- Kooxda Dhaq-dhaqaaqa 3 – awoodi kara uun inay fuulaan 1 ama 2 sallaan ama jaranjaro oo keli ah.

Xayaysiisyada dhexdooda waxaa la calaamadayn doonaa guryaha ku habboon dadka Kooxdaada Dhaq-dhaqaaqa ku jira marka la eego guryahaasna mudnaanta waxaa caadi ahaan la siin doonaa dadka ku jira Kooxdaada Dhaq-dhaqaaqa.

### **MAXAA DHICI DOONA HADDII AY XAALADAYDU IS-BEDESHO?**

Waa inaad Kawnsalkaaga/Ururkaaga Guryeynta la socodsiisa wixii is-beddel ah ee ku dhaca gurigaaga dadka ku nool, caafimaadkaaga ama xaaladdaada guryeynta la xiriirta. Tani aad ayay muhiim u tahay waayo waxay keeni kartaa in la beddelo dabaqadda aad ku jirto ama sida aad ugu qalantid guryaha qaarkood.

### **SIDEEN U CODSAN KARAA GURI?**

Waxaad codsan kartaa ilaa iyo saddex guri oo lugu xayaysiiyey 'Locata HOME' dhexdiisa mar walba oo uu soo baxo waxaanad u baahantahay oo keliya inaad soo dirto tigid yar, adigoo adeegsanaya telefoonka ama ka qoraalka. Waxaad weliba codsiyadaada ka gudbin kartaa internetka, adigoo adeegsanaya bogga "Make your bid"("Codsigaaga samee"). Locata waxay isu-eegaan jawaabaha la soo celiyo iyo guriga waxayna fiiriyaan in codsade walbaaba uu u qalmo gurigaas. Locata waxay markaasna dhammaan qoysaska u qalma isugu xigsiyaan habka mudnaantooda waxayna markaas taxane gaaban u diraan qofka guriga leh.

## Habka aad guri uga codsan kartid shabakada Internetka

1	Furo sahamiyahaaga interenet oo booqo::	<b>www.locata.org</b>
2	Taabo is-ku xiraha 'login'(gal)	Kani wuxuu ku geyn doonaa bogga laga galo
3	Soo qaado 3da xaraf ee ah xaafaddaada oo la soo gaabiyey, markaasna garaac qaybta lambarka ah ee Lambarka LIN:	Tusaale ahaan. Haddii aad tahay Xubin Ealing degan oo lambarkaaga LIN uu yahay EAL12345, waxaad taxanaha ka soo qaadanaysaa "EAL" waxaanad markaas meesha ku xigta ku qoraysaa "12345"
4	Taariikhda dhalashadaada ku qor meesha loogu tala-galay	Tusaale ahaan. 31 Jan 1960
5	Tani waxay ku geyn doontaa bogga xubnaha Halkan waxaad ka baari kartaa guryaha, waxaad ka soo qaadan kartaa xaashadda macluumaadka waanad gudbin kartaa codsigaaga. Si aad codsiyadaada u gudbiso, taabo isku-xiraha 'Bid for properties'(Guryo codso)	Kani wuxuu ku geyn doonaa bogga laga codsado guryaha.
6	Si aad codsigaaga u gudbiso, lambarka tixraaca ee guriga ee 3 lambar ah ku qor meelaha ku xiga 'Bid 1' (Codsiga 1aad), 'Bid 2' (Codsiga 2aad) iyo 'Bid 3'(Codsiga 3aad).	Tusaale ahaan. Haddii aad codsanaysid 3 guri oo lambaradooda tixraacu ay yihiin 428, 387 iyo 621, markaas meesha ku xigta 'Bid 1' ku qor "428", meesha ku xigta 'Bid 2' ku qor "387" meesha ku xigtana 'Bid 3' ku qor "621"
7	Taabo badhanka 'Submit Bids' (Dhiibo Codsiyada)	
Khalaas, codsiyadaada waad gudbisey.		

## Habka aad guri ugu codsan kartid Telefoonka Qoraalka ah

	<u>Waxaad qabanaysid</u>	<u>Tusaale</u>
1	Si aad u bilowdo inaad gudbiso codsiyadaada:	Telefoon qoraal ah bilow
2	Badhanada kaga qor lambarkaaga LIN:	BRE12345
3	Kuna xigsii markaaba calaamadda (#):	BRE12345#
4	Waa inaad iminka qorta lambarka tixraaca xayaysiiska codsigaaga ugu horeeya oo ay markaaba ku xigto calaamadda (#):	BRE12345#456#
Haddii aad dhamaysay Gudbinta codsiga markaas dir. Haddii kale, daba-raac tilmaan-bixinada hoose.		
5	Waa inaad iminka qortaa lambarka tixraaca ee xayaysiiska codsigaaga 2aad oo ay markaaba ku xigto calaamadda (#):	BRE12345#456#491#
Haddii aad dhamaysay Gudbinta codsiga markaas dir. Haddii kale, daba-raac tilmaan-bixinada hoose.		
6	Waa inaad iminka qortaa lambarka tixraaca xayaysiiska codsigaaga 3aad oo ay markaaba ku xigto calaamadda (#):	BRE12345#456#491#444#
7	Marka aad qortay dhammaan codsiyadaada dir Telefoonka qoraalka ee aad codsigaaga ku gudbinayso:	“Send”(Dir)
8	Lambarka ay tahay inaad codsigaaga u dirtid waa:	<b>07800 140767</b>
<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ugu badnaantood shirkadaha telefoonka gacantu waxay dadka ka qaadan 10p markastoo ay dirtaan telefoon qoraal ah (SMS)</li> <li>• Si aad lambar ugu dartid fariinta hoos u sii riix badhanada ilaa aad arkaysid lambarka oona dooro.</li> <li>• Telefoonada gacanta ugu badnaan si looga helo calaamadda (#) horta riix badhanka xiddigta u eeg markaasna dooro calaamadaas (#).</li> <li>• Waxaad codsiyadaada ku qori kartaa xarfaha weyn iyo kuwa yarba</li> <li>• Fiiri in lambarkaaga LIN iyo Codsiyadaadu ay sax yihiin inta aadan dirin</li> </ul>		

## Habka aad guri uga codsan kartid Telefoonka

	<u>Waxaad qabanaysid</u>	<u>Tusaale</u>
1	:Si aad u bilowdo inaad gudbiso codsiyadaada garaac:	<b>0906 294 2012</b>
2	Waxaad maqli doontaa:	“Welcome to the Locata Property Line, Please select the Borough or RSL you are registered with from the following list.”(Ku soo dhawow Khadka Guryaha ee Locata. Fadlan dooro Xaafadda ama Dadka guriga leh ee Bulshada la Shaqeeya (RSL) ee aad diiwaan kaga jirto kana dooro taxanahan soo socda.)
	Garaac 1 Garaac 2 Garaac 3 Garaac 4  Garaac 5  Garaac 6  Garaac 7	For Brent (Haddii aad Brent ka socotid) For Ealing (Haddii aad Ealing ka socotid) For Harrow (Haddii aad Harrow ka socotid) For Hillingdon (Haddii aad Hillingdon ka socotid) For Hounslow (Haddii aad Hounslow ka socotid) For Ealing Family Housing Association (Haddii aad Ururka Guryeynta Qooyaska Ealing ka socotid) For PCDHA (Haddii aad PCHA ka socotid)
3	Waxaad markaas maqli doontaa:	“Thank you. Please enter the number section of your LIN number.” (Waad mahadsan tahay. Fadlan garaac qaybta lambarka ah ee lambarkaaga LIN.)
4	Waa inaad iminka garaacdaa uun qaybta lambarada ah ee lambarkaaga LIN. Markaad garaacdid lambarka saxda waxaad maqli doontaa:	“Thank you. Please enter the day number of your birth date”(Waad mahadsan tahay. Fadlan garaac lambarka sheegaya maalintii taariikhda dhalashadaada) tusaale ahaan Haddii la eego 16/04/60 inta loo baahanyahay waa 16 Haddii la eego 08/01/58 inta loo baahanayahay waa 08 (waa inaad 0 hor marisaa lambarka keligiis ah) Haddii la eego 23/06/31 inta loo baahanyahay waa 23
5	Waa inaad iminka garaacdaa lambarka sheegaya maalintii:taariikhda dhalashadaada. Markaad garaacdid lambarka saxda ah waxaad maqli doontaa:	“Thank you. Please enter your first property reference bid number.”(Waad mahadsan tahay. Fadlan garaac lambarka tixraaca ee guriga ugu horeeya ee aad codsanaysid.)
6	Markaad si sax ah u garaacdid lambarka tixraaca guriga waxaad maqli doontaa:	“Thank you. If you would like to add an additional bid press 1 or press 2 to complete your bids.” (Waad mahadsan tahay. Haddii aad rabtid inaad codsi kale samaysid garaac 1 ama garaac 2 si aad halkaas ugu dhammaystirtid codsiyadaada.)

7	Markaad garaacdid 1 waxaad maqli doontaa:	“Please enter your second property bid number or press the * key to complete your bidding.”(Fadlan garaac lambarka guriga labaad ee aad rabtid inaad codsatid ama garaac badhanka * si aad u halkaas ugu dhammaystirtid codsigaaga.)
8	Markaad si sax ah u garaacdid lambarka tixraaca guriga labaad waxaad maqli doontaa:	If you would like to add an additional bid, please press 1 now or press 2 to complete your bidding.” (Haddii aad rabtid inaad codsi kale samaysid, fadlan iminka garaac 1 ama garaac 2 si aad halkaas ugu dhammaystirtid codsigaaga.)
9	Markaad codsigaaga dhammaysid waxaad maqli doontaa:	“Thank you for bidding on the Locata Property line.” (Waad ku mahadsan tahay inta aad codsigaaga ka gudbisey Khadka Guryaha ee Locata.)
Haddii aad qalad samaysay waxaad maqli doontaa tilmaan-bixin hadba sida habboon ee soo socota:		
10	Haddii aad qaladday lambarkaaga waxaad maqli doontaa:	“I am sorry, the LIN number you have entered is not recognised. Please try again.” (Waan ka xumahay, lambarka LIN ee aad garacday waa la garan waayey. Fadlan dib u garaac.)
Haddii ay tani dhacdo si taxadar leh dib ugu garaac lambarkaaga adigoo iska-hubinaya inuu lambarku sax yahay		
11	Haddaad qalado dheeraad ah samaysid waxaad maqli doontaa:	“I am sorry, the LIN number you have entered is not found. Please check with your registering partner and call again.” (Waan ka xumahay, lambarka LIN ee aad garacday waa la heli waayey. Fadlan wax ka weydii dadka aad diiwaanka kaga jirtid ee aan is-kaashano markaasna dib noo soo wac.)

# Habka aad Tigidka yar guri ugu codsan kartid

<p>Tigidkaaga yar waxaa ku qoran magacaaga iyo lambarkaaga LIN (Lambarka Aqoonsiga Locata) - fadlan is-ka fiiri inay macluumaadkani sax yihiin.</p>	<p>Waa inaad X ku qortaa safka labaad oo aad hor dhigtaa lambarka labaad ee la xiriira ee lambarka tixraaca.</p>
<p>Waxaad codsan kartaa ilaa iyo saddex guri xaashad walba ee macluumaadka ee soo baxda.</p>	<p>Waa inaad X ku qortaa safka saddexaad oo hor dhigtaa lambarka saddexaad ee la xiriira ee lambarka tixraaca.</p>
<p>Guri kastaaba wuxuu leeyahay lambar tixraac oo 3 lambar ka kooban, kaasoo ka muuqda xayaysiiska guriga ee xaashadda macluumaadka ee 'Locata HOME'.</p>	<p>Ku qor taariikhda boogga hore kaga taal xaashadda macluumaadka ee 'Locata HOME', ee aad guryo ka codsanaysid.</p>
<p>Tusaale ahaan haddii aad rabtid inaad codsatid guryaha lambarkooda tixraaca ee 3da lambar ah u yahay 456, 491 iyo 444, waa inaad tigidka yar u calaamadaysaa sida uu muujinayo nuqulka tusaale ahaan loo isticmaalayo. Waa inaad X ku qortaa safka ugu horeeya oo aad hor dhigtaa lambarka ugu horeeya ee la xiriira ee lambarka tixraaca.</p>	<p>Fadlan tigidkaaga yar Locata boosta ugu soo rid. Ciwaanku wuxuu ku sii qoran yahay tigidka yar, laakiin waxaad u baahan doontaa inaad faranka-boollo ku dhajiso.</p>

Bids for properties in this edition have to be recieved by the closing date shown on the front cover, please fill your coupon in with black or blue ink only.

Bid 1	Bid 2	Bid 3
1 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	1 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/>	1 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
2 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	2 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	2 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
3 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	3 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	3 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
4 <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	4 <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	4 <input checked="" type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/>
5 <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	5 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	5 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
6 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	6 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	6 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
7 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/>	7 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	7 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
8 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	8 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	8 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
9 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	9 <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	9 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>
0 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	0 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>	0 <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> <input type="checkbox"/>

Freesheet Date  
3 0 0 4 0 4  
D D M M Y Y

## **Habka aad Telefoonka uga codsan kartid** **Tigidadaada yar yar**

1	Si aad tigidadaada u codsatid garaac:	<b>0906 294 2013</b>
2	Waxaad maqli doontaa:  Garaac 1 Garaac 2 Garaac 3 Garaac 4 Garaac 5 Garaac 6  Garaac 7	“Welcome to the Locata Coupon line. Please select the Borough or RSL you are registered with from the following list.”(Ku soo dhawow khadka Tigidka yar ee Locata. Fadlan dooro Xaafadda ama RSLka aad diiwaanka kaga jirto kana dooro taxanaha soo socda.) For Brent (Haddii aad Brent ka socotid) For Ealing (Haddii aad Ealing ka socotid) For Harrow (Haddii aad Harrow ka socotid) For Hillingdon (Haddii aad Hillingdon ka socotid) For Hounslow (Haddii aad Hounslow ka socotid) For Ealing Family Housing Association (Haddii aad Ururka Guryeynta Qooyaska Ealing ka socotid) For PCDHA (Haddii aad PCHA ka socotid)
3	Waxaad markaas maqli doontaa:	“Thank you. Please enter the number section of your LIN number.” (Waad mahadsan tahay. Fadlan garaac qaybta lambarka ah ee lambarkaaga LIN.)
4	Waa inaad iminka garaacdaa uun qaybta lambarada ah ee lambarkaaga LIN. Markaad garaacdid lambarka saxda waxaad maqli doontaa:	“Thank you. Please enter the day number of your birth date” (Waad mahadsan tahay. Fadlan garaac lambarka sheegaya maalintii taariikhda dhalashadaada) tusaale ahaan Haddii la eego 16/04/60 inta loo baahanyahay waa 16 Haddii la eego 08/01/58 inta loo baahanayahay waa 08 (waa inaad 0 hor marisaa lambarka keligiis ah) Haddii la eego 23/06/31 inta loo baahanyahay waa 23

### **SIDEEN U HELI KARAA JAWAAB-CELIS KU SAABSAN CODSIYADAYDA?**

Dhammaan guryaha la kireeyaa waxay ku taxan yihiin qaybta jawaab-celiska ee wargeyska ‘Locata HOME’. Waxaan kuu sheegi doonnaa tirada dadka codsaday guri walba iyo dabaqadda iyo taariikhda diiwaan-gelinta qofka ku guuleystey codsigiisa. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad heerka mudnaantaada barbar dhigtid kuwa ku guuleystey. Waxaad markaas isku-hagaajin kartaa waxyaabaha aad u baahantahay oo aad ku toosin kartaa xaafad ama nooca guri haddii aad u baahantahay inaad si dhakhso ah wax u qabatid..

## **SHANTA TALLAABOOD EE LUGU DOORTO GURI CUSUB**

### **TALLAABADA 1 XUBIN AHAANSHO**

Waxaa dhici kartaa inaad tahay kirayste hadda jira oo sugaya in meel kale loo wareejiyo, qof iminka guri la', qof guri ka kiraystay oo kaga jira qof ka socda waaxda khaaska ah, qof guri leh/kuna nool ama qof la nool reerkooda ama asxaabtiisa.

### **TALLAABADA 2 DIIWAAN-GELIN**

Kawnsalka xaafaddaada ama ururkaaga guryeynta ayaa qoraal kugu xaaqiijin doona diiwaan-gelintaada iyo dabaqadda lugugu qoray.

### **TALLAABADA 3 DOORASHADA**

Wargeyskeena bilaashka ah, 'Locata HOME', ayaad ka soo qaadan kartaa meelo badan oo xaafaddaada ku yaal. Si aad u codsatid guriga aad dooratid waxaad isticmaali kartaa tigid yar, telefoonka, telefoonka qoraalka ah ama waxaad booqan kartaa shabakadeena.

### **TALLAABADA 4 SIINTA**

Haddii codsigaagu uu taxanaha halka hore uga galo Kawnsalka Xaafaddaada ama Ururkaaga Guryeynta ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuugu diyaariyaan inaad soo eegto guriga.

### **TALLAABADA 5 JAWAAB-CELIS**

'Locata HOME' waxaa lugu bixin doonaa faah-faahin ku saabsan tirada dadka codsaday guryahii ku jiray daabacaadyadii hore.

## **MAXAY YIHIIN FURSADAH KALE EE AAN GURI KU HELI KARO?**

Guryuhu aad ayay ugu yar yihiin galbeedka London, markaa qorshahani xallin maayo dhibaataada qof walba ka haysata guryeynta. Xubnuhu intooda ugu badan waxay weli sugi doonaan waqti dheer si loogu helo guri kale xubnaha dabaqadaha C iyo D ku jiraana ugu badnaantood waxay weli si yar fursad uga sii lahaan doonaan in xaafadda guri kale looga helo. Si dadka loo siiyo fursado dheeraad ah, waxaan xayaysiin doonaa guryo ku yaal xaafado London ka baxsan, sida gobolka Midlands, halkaas oo uu dalabku ku yar yahay, iyo sidoo kale guryo si wadaaga loo lahaado oo ku yaal galbeedka London. Guryo si khaas ah loo kireeyo ayaa weliba laga soo ban-dhigayaa wargeyska 'Locata HOME' dhexdiisa.

**HABKA LOOLA XIRIIRI KARO  
DADKA GURYAHA LEH**

**Lambarada Telefoonka**

London Borough of Brent  
(Xaafadda Brent ee London ka mid ah)  
Mahatma Ghandi House  
34 Wembley Hill Road  
Wembley, Middlesex  
HA9 8AD

020 8937 2000

London Borough of Ealing  
(Xaafadda Ealing ee London ka mid ah)  
Housing Resource Centre  
(Xarunta Macluumaadka Guryeynta la xiriira)  
Town Hall Annexe  
New Broadway  
London  
W5 2BY

020 8825 7274

London Borough of Harrow  
(Xaafadda Harrow ee London)  
Youngmans 2 Building  
PO Box 65  
Civic Centre  
Station Road  
Harrow, Middlesex  
HA1 2XG  
Email: locatahelp@harrow.gov.uk

Magacyada  
Qoyska  
A ilaa Cg  
Ch ilaa G  
H ilaa Lg  
Lh ilaa O  
P ilaa Sg  
Sh ilaa Z

020 8424 1116  
020 8863 5611  
020 8424 1706  
020 8424 1115  
020 8863 5611  
020 8863 5611

gaar.3870

gaar..3738  
gaar.3663

London Borough of Hillingdon  
Housing Services  
Civic Centre  
High Street  
Uxbridge, Middlesex  
UB8 1UW  
Email: nmailbox@hillingdon.gov.uk

01895 250 328  
01895 277 779  
01895 250 147  
01895 250 389

London Borough of Hounslow  
(Xaafadda Hounslow ee London)  
The Civic Centre  
Lampton Road  
Hounslow  
TW3 4DN

020 8583 3815  
020 8583 4405

Ealing Family Housing Association  
(Ururka Guryeynta Qoysaska Ealing)  
St James House  
105-113 Broadway  
West Ealing  
London  
W13 9BE  
Email: csc.queries@chq.org.uk

020 8621 9898

Paradigm Housing Group  
(Shirkadda Guryeynta ee Paradigm)  
1 White Hill  
Chesham  
Bucks  
HP5 1AB

0845 845 5517

PCHA Housing Association  
(Ururka Guryeynta ee PCHA)  
324 Harrow Road  
London  
W9 2HP

020 8537 4537